


Mashruuca kor u qaadista inta aad kala qabsaneysid shaqada dadka qoxootinimada loo aqoonsadey iyo dadka si ku meel gaar ahaan loo ogolaadey

U tababarid (leylin ama u carbin)




Somalisch

Grabenstrasse 1
7001 Chur

 081 257 26 38

www.hallo.gr.ch
www.fluechtlinge.gr.ch

Fachstelle Integration Graubünden, Grabenstrasse 1, 7001 Chur

 Fachstelle Integration Graubünden
Post specialisà per l'integraziun dal Grischun
Servizio specializzato per l'integrazione dei Grigioni



ujeedo

- Dhameyso ama ka qaado tababar shaqo dhowrbilood ah hal shirkad.
- Adeegso ama isticmaal aqoontaada luqadeed iyo tan shaqaba.
- Iska hubi tiro iyo tayo ahaanba shaqomaalmeedka sida runta ah.
- Marmarka qaarkood haddii shirkadu u bogto shaqadaada iyo kartidaada ama dulqaadkaada marka ay dhamaato tababarka waxay ku siin karaan oo ay awood u leeyihiin in ay waxbarasho ku siiyaan ama ay kaa shubaan lacagta waxbarashadda amaba ay ku siiyaan shaqo waqti qeyb ah ama shaqo buuxda oo ayagaba ku qaataan.

Heshiisyada guud ee laguula gelayaa bilowga tababarka

- Ka hor inta aadan bilaabin tababarka shaqo waxaa laguula gelayaa heshiis, heshiiskaaso waafaqsan sharciga labada dhinacbana ay saxiixayaan (adiga iyo shirkadda). Tabatarkaas shaqo wuxuu soconayaa waqti go,an oo shaqsi kasta waqti mucayin ah lala galo.

U tababarid (leylin ama u carbin)

Fursadaas lagu siiyey waxaa lagaaga doonayaa natiijo la taaban karo (miro dhal ah)

- Waa in aad muujisaa ama soo banaan dhigtaa karti iyo hufnaan shaqo.
- Waxaad haysataa fursad aad isku ogaato inta uu karankaada dhanyahay, isna barbar dhigto shaqada aad qabaneyso iyo dadka kula shaqeeya shaqadooda, ka barato waxay kaaga fiicanyihiin.
- Isku day in aad soo bandhigto shaqo wanaagsan, lagaana dareemo in aad shaqadaan diyaar aad u tahay, daacadna u tahay.
- Waxaad barataa shaqaalaha kula shaqeeya, xiriir fiicana la yeelo.
- Aqoontaada afka jarmalka si fiican u wanaaji.
- Marka aad dhameyso tijaabada ama tababarka shaqada shirkadda waxay ku siinaysaa warqad cadayn ah. Haddii lagu siiyo cadayn fiican waxay kaa caawinaysaa raadinta shaqo iyo talaabada ku xigta ee aad qaadeyso micnaha (haddii aad waxbarasho sii wadeysid iyo haddii aad shaqo raadsaneysidba).

Talaabada kuugu xigta ee aad qaadeyso

- In aad sii wadatid tijaabada shaqo
- Koorsooyinka aad weli qaadanin ama kuu harsan inta lagu guda jiro mashruuca isdhexgalka in aad hadda sameyso
- Koorsooyin gaar u ah shaqada aad hadda tijaabada ku sameynayso ama shaqada aad mustaqbalka doonaysid in aad qabato
- Waxbarasho joogta ah
- Shaqo go,an oo maalmo keliya la shaqeeynaayo ama shaqo maalinwalba ah

